


**Washington State Department of Children, Youth & Families**
P.O. Box 40970
Olympia, WA 98504-0970
Toll-free: 1-866-482-4325
**www.dcyf.wa.gov**


*Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dukumintigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xiriir DCYF Constituent Relations (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*


DCYF PUBLICATION EPS_0019 SM (04-2020) Somali


# Waxaad Leedahay Dookh!

*Tilmaamaha ku saabsan helitaanka Daryeelka Hore ee Tayada iyo Dejinta Barashada Gobolka Washington*



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## Waa maxay Early Achievers?

Early Achievers waa qaab lagu hagaajinayo tayada daryeelka ilmaha iyo goobaha waxbarashada hore si loo hubiyo:

- **Caruurta** waxay ka helaan khibrado waxbarasho oo tayo sare leh oo ka caawiya iyaga inay horumariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan dugsiga iyo wixii ka dambeeya.
- **Qoysaska** waxay ka helaan daryeel tayo sare leh oo carruurta ah iyo barnaamijyo waxbarasho hore oo ku habboon baahidooda iyadoo la siinayo macluumaad aan eex lahayn oo ku saabsan tayada xarunta.
- **Xirfadlayaasha Waxbarashada Hore** waxay ka helaan agabyada iyo taageerooyinka ay u baahan yihiin si loo siiyo daryeel tayo leh oo taageeraya canug walba waxbarashadiisa iyo horumarkiisa.

Kaqaybqaadashada Early Achievers, bixiyeyaasha xanaanada cunugga waxay muujinayaan sida ay uga go'antahay hagaajinta tayada daryeelka carruurta si aad u dareento kalsooni ku saabsan doorashada daryeelka ilmahaaga.

Ka qaybqaadashadu waa u lacag la'aan bixiyeyaasha markaa ma jiraan qarash dheeraad ah oo ku baxa qoysaska.

Si aad wax badan uga ogaato Early Achievers, aad **www.dcyf.wa.gov/early-achievers**.

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Early Achievers waxay bixisaa macluumaad ku saleysan caddeyn ku saabsan tayada barnaamijyada waxbarashada hore iyadoo loo marayo nidaamka qiimeynta ee si fudud loo fahmi karo.

- Bixiyeyaasha ka shaqeeya ama qiimeeya **Heerka 2** ayaa "ka qayb qaadanaya kor u qaadista tayada" iyada oo loo marayo fursado wax barasho xirfadeed.
- Adeeg bixiyayaasha lagy qiimeeyay **Heerka 3-5** ku gaadhay "heer tayo sare leh" qiimayn goobta ka dhacday. Waxay la shaqeeyaan tababare si ay u sameeyaan horumarin tayo oo joogto ah.

Arag xaalada bixiyaasha 'ka qeybgalka Early Achievers' **www.findchildcarewa.org**.



**HEERKA 5: 91-100 dhibco**
*Ku fiicnaaday Tayo Sare*

**HEERKA 4: 70-90 dhibcood**
*Ku fiicnaaday Tayo Sare*

**HEERKA 3+: 50-69 dhibcood**
*Muujinta Tayo Sare*

**HEERKA 3+: 30-49 dhibcood**
*Ka go'an Tayo Sare*

**HEERKA 2:**
*Kobaca Xirfadeed iyo Maareynta*

**HEERKA 1:**
*Daryeelka Carruurta ee Ruqsadda haysta - Aasaaska Tayada*

## Maxaan ugu doortaa xanaanada cunugga ruqsada haysta?

Ruqsadaha Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) in ka badan 5,000 oo xarumo lagu daryeelo carruurta ah oo ku yaal Washington. Xarumaha xanaanada cunugga ee ruqsada haysta waxay raacaan qawaaniinta ruqsad siinta gobolka si loo hubiyo in caruurtu ku sugan yihiin jawi nabdoon oo caafimaad leh oo taageera horumarka ilmaha.

Si aad u hesho daryeel cunug ruqsad u haysta bulshadaada, kala xiriir Child Care Aware ee Washington taleefanka 1-800-446-1114 ama booqo **www.childcareawarewa.org**.

Hubi xaaladda daryeel bixiyahaaga xanaanada cunugga ee shati haysta Child Care Check. Aad **www.findchildcarewa.org**.

## Doorashada Daryeelka Ilmaha

Maxay muhiim u tahay adiga iyo qoyskaaga markaad dooranayso barnaamijka waxbarashada hore? Way ku caawin kartaa inaad tan qaadato markii aad booqatid boggaga. Xusuusnow inaad weydiiso inay ka qeybgalayaan Early Achievers!

### Deegaanka ma badqabtaa oo ma caafimaad qabtaa?

- ☐ Ma jiraan shaqaale ku filan oo carruurta oo dhan firo gaar ah u leh?
- ☐ Ma leeyihiin qufullo albaabka looga celinayo dadka aan la aqoon banaanka carruurtana gudaha?
- ☐ Goobaha lagu ciyaaro ee dibadda ma u muuqataa mid nabdoon?
- ☐ Alaabada ay ku ciyaaraan iyo qalabku ma yihiin kuwo ammaan ah oo da' ku habboon?
- ☐ Ma jiraa qorshe deg deg ah oo lala xiriirayo qoysaska?

### Muxuu ilmahaygu la kulmi doonaa maalintii?

- ☐ Ma jiraan hawlo qorshaysan oo ka caawinaya ilmahayga inuu waxbarto?
- ☐ Waqtiyada nasashada miyay ku saleysan yihiin baahida ilmo kasta?
- ☐ Miyaa lagu ixtiraamaa dhaqamada qoysaska waxqabadyada iyo xafladaha?
- ☐ Ilmahaygu ma helayaa waqti maalin kasta oo uu ku cararo, wax ku qabto, ku fuulo ama ku tuuro?
- ☐ Buugaagta ma loo heli karaa carruurta oo ku qoran luqadooda iyo da'da kala duwan?

### Waa maxay siyaasadaha saameyn doona isdhexgalka cunugeyga ee dadka kale?

- ☐ Shaqaaluhu ma dejiyaan xad macquul ah, oo cad, iswaafaqsan kuna habboon da'da?
- ☐ Shaqaaluhu ma isticmaalaan codad deggan oo carruurta ma u wareejiyaan waxqabadyo kale haddii dhibaato jirto?
- ☐ Maxaa dhacaya marka carruurtu wax garaacdo, wax qaniinto ama xoog sheegato?
- ☐ Sidee barnaamijku uga qayb qaataa qoysaska?
- ☐ Miyaa laygu dhiirrigeliyey inaan waqti ku qaato marti ahaan qado ahaan ama tabaruc ahaan?
- ☐ Sideen ku maqli doonaa maalinta ilmahayga?
- ☐ Miyaan dareemayaa ixtiraam sida macallinka ugu horreeya uguna muhiimsan ee ilmahayga?

### Ilmahaygu halkan ma ku hormari doonaa?

- ☐ Dhaqammada, qowmiyadaha iyo awoodaha kala duwan miyaa la qiimeeyaa?
- ☐ Shaqaaluhu ma dhiirrigeliyaan hal-abuurka iyo madax-bannaanida da'da ku habboon?
- ☐ Isla dadkaa si joogto ah ma u daryeeli doonaan ilmahayga?
- ☐ Carruurta ma loo raaxeeyaa markii loo baahdo?
- ☐ Shaqaaluhu ma qabtaan oo way salaaxaan dhallaanka iyo socod-baradka inta badan, oo ay ku jiraan inta ay quudinayaan?
- ☐ Ilmahaygu halkan ma ku baashaali doonaa?

## Waa maxay Kaabista Daryeelka Ilmaha?

Barnaamijyada Kaabista Daryeelka Carruurta waxay qoysaska ka caawiyaan inay ku bixiyaan daryeelka xanaanada cunugga tayada leh iyada oo loo marayo Working Connections Child Care (Xiriirinta Shaqada ee Daryeelka Carruurta) (WCCC) ama Seasonal Child Care (Daryeelka Ilmaha Xilliyeed) (SCC).

**Working Connections Child Care (Xiriirinta Shaqada Daryeelka Ilmaha):** waxay ka caawisaa qoysaska dakhligoodu hooseeyo bixinta daryeelka carruurta inta ay shaqeynayaan ama buuxinayaan shuruudaha kaqeybgalka WorkFirst. DCYF waxay bixisaa qayb ka mid ah kharashka xanaanada cunugga ee qoysaska aqoonta u leh bixiyaha u qalma. Waalidiintu waxay bixiyaan lacagta biixnta wadaaga ah ee ay siinayaan adeeg bixiyahooda bil kasta.

**Seasonal Child Care (Daryeelka Ilmaha Xilliyeed):** waxay bixisaa daryeel caafimaad oo ammaan ah, ruqsad haysta inta waalidku ka shaqeeyaan goobaha beeraha. Qoysaska u qalma ayaa xilliyada ka shaqeeya shaqada beeraha, waxay ku nool yihiin degmooyin loo qoondeeyay mana helaan dheefaha TANF.

**Child Welfare Child Care (CWCC):** waxay ka caawisaa carruurta helay adeegyada ilaalinta ilmaha, adeegyada daryeelka carruurta ama adeegyo iyada oo loo marayo jawaabta qiimeynta qoyska lixdii bilood ee la soo dhaafay si ay u helaan adeegyo daryeel ilmo oo ammaan ah, oo tayo sare leh, oo aan qiimo lahayn.

DCYF waxaa laga yaabaa inay awoodo inay lacag siiso qoyskaaga, saaxiibbadaada, ama deriskaaga si ay daryeel ugu fidiso ilmahaaga. Wixii xog dheeraad ah, booqo: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training**.





### Shuruudaha U qalmitaanka

Si aad xaq ugu yeelatid kabista xanaanada cunugga, waxa soo socda ayaa loo baahanyahay:

- Carruurta u baahan daryeelka kaabista ah waa inay noqdaan muwaaddiniin Mareykan ah ama sharci ku deggan.
- Qoysku waa inay ku noolaadaan Gobolka Washington.
- Dakhliga qoysku waa inuu ahaadaa ama ka hooseeya 200% heerka saboolnimada federaalka marka la codsado ama 220% dib loo codsado.
- Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waa inay ka shaqeeyaan ama iskood uga shaqeeyaan sharci ahaan, dakhli abuurid, waxqabadyo la cashuurayo; ama waalidka/wakiilka waa inay buuxiyaan dhamaan shuruudaha TANF/WorkFirst hadii ay helayaan caawinaada TANF.
- Waalidka ama ilaaliyaha waa inuu buuxiyaa arjiga CCSP oo uu siiyaa cadeynta lagama maarmaanka ah DCYF.

Si aad u dalbato kaalmada daryeelka ilmaha, la xiriir Xarunta Xiriirka Kaabista Daryeelka Carruurta ee DCYF 1-844-626-8687 ama ka dalbo khadka tooska ah ee Washington Connection ee **www.washingtonconnection.org**.

Si aad wax badan uga barato doorashada daryeelka ilmaha iyo kaalmada kharashyada daryeelka ilmaha, booqo **www.dcyf.wa.gov/early-achievers**.